



Australian Government



ParentsNext

Haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah



Waalidiinta iyo daryeelayaashu waxey haysan karaan wax badan noloshooda ka socon kara. Waa muhiim in la ogaado in taageero la heli karo.

La taliyayaasha ParentsNext waxay kugu xidhi karaan adeegyada maxaliga ah si ay kaaga caawiyaan:



la-talin



talo dhaqaale



rabshadaha qoyska iyo guriga



caafimaadka jirka iyo maskaxda



guryo siin

Haddii ay dhibaato kaa haysato, la hadal la-taliyahaaga. Way beddeli karaan hawshaada ama waxay tixgelin karaan ka-dhaafis.

Ka dhaafitaanku wuxuu ka dhigan yahay inaanad sameyn hawlo muddo ah. Weli waxaad ka heli kartaa caawimaad iyo taageero la-taliyahaaga ParentsNext haddii aad u baahatid.

Sababaha ka cafinta waxaa ka mid noqon kara:

- arrin caafimaad oo daran
- dhimashada qoyska
- uur leedahay iyo 6 toddobaad gudahood laga bilaabo taariikhda dhalmaada la filayo
- Ganacsiga dhaqanka ee Indigeneous ka
- ahaanshaha daryeelaha koowaad ee 4 carruur ah ama kabadan
- dugsi-guriga la oggolaaday.

La-taliyahaaga ParentsNext wuxuu ku weydiin doonaa caddeyn kala duwan iyadoo kuxidhan sababtaada ka-dhaafitaanka.

Haddii la-taliyahaagu **aanu ku siinayn ka-dhaafitaan** waxaad weydiisan kartaa inay dib u eegaan go'aankooda. Haddii aadan ku faraxsanayn jawaabtooda, waxaad codsan kartaa dib-u-eegis madax-bannaan oo ay sameyso Waaxda Waxbarashada, Xirfadaha iyo Shaqaalaynta adoo wacaya Khadka Adeegga Macaamiisha Qaranka ee **1800 805 260** ama iimayl u soo dir: **nationalcustomerserviceline@dese.gov.au**

Haddii aadan weli ku qanacsanayn go'aanka, waxaad rafcaan uga qaadan kartaa Maxkamadda Rafcaannada Maamulka.

Waxii macluumaad intaa dhaafsiisan tag dese.gov.au/parentsnext